Kaalinti**i** garsoorka **ee doorashooyinka dalka ka qabsoomay marxaladdii dawladda rayidka:1960 ilaa 1969**

Tusmo:

1- Hordhac

2- Kaalinta shuruucdii doorashooyinku siisay garsoorka

3- Murannadii iyo khilaafaddkii dhacay ee doorshooyinka la xiriiray sidee ayuu garsoorku u xalliyay?

4- Gunaanad

Hordhac

Kalsoonida garsoorka lagu qabo iyo ahmiyadda uu bulshada u leeyahay waxay si fiican u muuqan kartaa' marka garsoorku yahay mid madax-banaan' dhaxdhaxaad ah ' loo simanyahay oo bulshada iyo dawladda si siman ugu garnaqi kara.

Sidoo kale halbeegga lagu cabiro garsoorka in uu yahay madax-bannaan**'** dhaxdhaxaad ah loona simanyahay iyo inkale wuxuu si wanaagsan u muuqanayaa marka garsoorku uu si siman ugu garnaqo dawladda iyo dadwaynaha iyo sida uu go'aan sharciga ku salaysan uga gaaro murannada iyo khilaafaadka la xiriira siyaasadda oo dawladdu ay ku lug leedahay sida doorashooyinka.

Haddii alle Idmo waxaan si kooban uga hadli doonnaa kaalintii garsoorka ee doorashooyinkii ka qabsoomay soomaaliya marxaladdii dawladdii rayidka, doorashooyinkaas oo iskugu jiray kuwa Madaxtinimada (presidential election), Kuwa golayaasha sharcidejinta iyo kuwa golayaasha dawladaha hoose' annaga oo xoogga saari doonna laba arrimood oo kala ah:-

- Kaalinta shuruucdii doorashooyinku siisay garsoorka iyo,
- Murannadii iyo khilaafaddkii dhacay ee doorshooyinka la xiriiray sida uu garsoorku u xalliyay.

Kaalinta shuruucdii doorashooyinku siiyeen garsoorka

Ugu horrayntii waxaan isku dayi doonnaa in aan si kooban u dulmarnno qoddobada qaanuuneed ee ku jira shuruucdii doorashooyinka ee marxaladdii dawladdii rayidka' gaar ahaan kuwii si gooni ah u khuseeyay kaalinta garsoorka dalka, waxaan ku bilaabi doonnaa shuruucdii doorashooyinka ee khuseysay doorashooyinka dawladaha hoose' kadibna waxaa ku xigi doona qoddobada qaanuuneed ee ku jira shuruucda doorashooyinka golayaasha sharcidejinta ee si gaar ah u khuseeya kaalinta garsoorka.

A- 1- Shuruucdii doorashooyinka golayaasha Dawladaha hoose iyo Kaalinta garsoorka

Marka aan fiirinno shuruucdii doorashiiyinka dawladaha hoose ee marxaladdaan dhaqangalka ahaa waxaan arki karnaa in shuruucdaas ay

garsoorka siisay kaallin muhiim ah oo ay ugu muhimsan yihiin kuwaan hoos ku xusn:-

- **Ka garnaqista dacwadaha la xiriira diidmada qabashada codsiyada murashaxnimada**

Sida uu jiddeynaayay qoddobka 12aad ee sharci lr 19 ee soobaxay 14/8/1963, haddii guddiyada iyo xafiisyada doorashooyinka golayaasha dawladaha hoose ay murashaxa ka diidaan in ay ka qabtaan codsiga murashaxnimada sababo la xiriira in uusan shuruudihii soo buuxin iyo kuwa kale' cidda laga diiday in codsiga laga qabto waxay xaq u leedahay in ay diidmadaas ugu dacwooto Maxkamadda g/balka ee ku taalla g/balka murashaxu uu iska soo sharaxay muddo ku siman 5 maalin oo ka bilaabanaysa maalinta la diiday murashaxnimadiisa, maxkamadda G/balkuna waa in ay dacwadaas go'aan uga gaartaa muddo 5 maalin ah gudahood oo ka bilaabanaysa maalinta dacwadda maxkamadda laga furay.

Haddii Maxkamadda G/balku ku raacdo Xafiiska doorashooyinka diidmadiisii ' Waxaa shaqsiga **danta** ku qaba u furan in uu cabasho uu qaato Maxkamadda sare ee dalka muddo ku siman 3 maalin' maxkamadda sarana waa in ay go'aan ku gaartaa muddo 20 bari gudahood, Cabashada Maxkamadda sare waa in ay ku qotontaa asbaabo qaanuuneed kaliya.[1]

- **Ansixinta doorashooyinka golayaasha dawlaha hoose**

Sida ku cad qoddobka 57aad ee Sharci lr 13 soona baxay 6 Juun 1968, oo lagu mideeyay shuruucda doorashooyinka golaha sharcidajinta qaranka iyo golayaasha dawlaha hoose, gudoomiyaha Maxkamadda G/balka

[1] fiiri qoddobka 12aad ee sharci lr 19 ee soobaxay 14/8/1963ee ku saabsan doorashooyinka dawladaha hoose

ee doorashadu ka dhacayso wuxuu leeyahay ansixinta iyo xaqiijinta in doorashooyinku ay u dhaceen si sharci ah' sidoo kale wuxuu leeyahay go'aan ka gaarista cabashooyinka la xiriira doorashooyinka'go'aankiisasa waxaa ka furan cabasho loo qaato Maxkamadda sare , oo ay waajib tahay in ay mar kasta ay ku qotonto asbaab qaanuuneed **oo** kaliya.[2]

- **Buuxinta kuraasta ka banaanaata golayaasha dawladaha hoose**

Haddii golaha dagmada uu ka banaanaado kursi sabab kasta ha ku timaadee' dekreeto ka soobaxday guddoomiyaha Maxkamadda dagmada ayaa lagu buuxinayaa kursigaas wuxuuna u magacaabayaa kursigaas tartamihii cod ahaan ku soo xigay tartamayaasha guulaystay.[3]

A-2- **Shuruucdii doorashooyinka golaha sharcidajinta qaranka iyo Kaalinta garsoorka**

- Dhagaysiga dacwadaha la xiriira diidmada qabashada codsiyada murashaxnimada

Sida ku xusan farqadda 3aad ee qoddobka 12aad ee sharci lr 4 ee soobaxay 22 Janaayo 1964 kuna saabsan doorashooyinka golayaasha sharcidajinta , haddii guddiyada iyo xafiisyada doorashooyinka golaha sharcidajintu ay murashaxa ka diidaan in ay ka qabtaan codsiga murashaxnimada sababo la xiriira in uusan shuruudihii soo buuxin iyo kuwa kale' cidda laga diiday in codsiga laga qabto waxay xaq u leedahay in ay

[2] fiiri qoddobka 57aad ee Sharci lr 13 soona baxay 6 Juun 1968, iyo qoddobka 50aad ee sharci lr 19 ee soobaxay 14/8/1963ee ku saabsan doorashooyinka golayaasha dawladaha hoose

[3] fiiri farqadda 3aad ee qoddobka 63aad ee Sharci lr 13 soona baxay 6 Juun 1968 iyo qoddobka 62aad ee sharci lr 19 ee soobaxay 14/8/1963ee ku saabsan doorashooyinka golayaasha dawladaha hoose

diidmadaas ugu dacwooto maxkamadda g/balka ee ku taalla g/balka murashaxu uu iska soo sharaxay muddo ku siman 3 maalin oo ka bilaabanaysa maalinta la diiday murashaxnimadiisa, maxkamadda G/balkuna waa in ay dacwadaas go'aan uga gaartaa muddo 3 maalin ah oo ka bilaabanaysa maalinta dacwadda maxkamadda laga furay.

- Haddii Maxkamadda G/balku ku raacdo Xafiiska doorashooyinka diidmadiisii' Waxaa diidmadaas ka furan cabasho loo qaato Maxkamadda sare ee dalka muddo ku siman 3 maalin' Maxkamadda sarana waa in ay go'aan ku gaaraysaa muddo 30 bari gudahood ah, Cabashada Maxkamadda sare waa in ay ku qotontaa asbaabo qaanuuneed kaliya.[4]

- Murannada doorashooyinka Xubnaha golaha shacabka

Maxkamadda Sare ee dalka fadhigeeda loo dhan yahay, waxay gashaa cabadhooyinka ku saabsan murannada la xiriira codadka ka mid noqoshada xubnaha Golaha shacabka ee qaranka, cabashooyinkaan ku saabsan xubinnimada Golaha Shacabka Qaranka, waxay ansax noqonaayaan marka ay waafaqsanyihiin dastuurka iyo sharciga doorashooyinka, muddada cabashadaan waa 30 maalmood, laga billaabo maalinta lagu dhawaaqo natiijada doorashada, ama marka ay dhacdo is waafajin la'aan ama ku xadgudubka qaabka doorashada.[5]

[4] Farqadda 3aad ee qoddobka 12aad ee sharci lr 4 ee soobaxay 22 janaayo 1964 kuna saabsan doorashooyinka siyaasadda

[5] fiiri qoddobada 5aad, 10aad iyo 11aad ee Xeerka nidaamka garsoorka xeer lr 3 soona baxay 30kii Juun 1962

B- **Murannadii iyo khilaafaddkii dhacay ee doorshooyinka la xiriiray sidee garsoorku u xalliyay?**

B-1- Doorashooyinka madaxtinimada

Marxaladdii dawladda rayidka waxaa dalka ka dhacay 3 doorasho madaxwayne oo mid ay ahayd KMG waxayna kala ahaayeen sidaan:-

1- Bishii luuliyo 1960, waxaa Dalka ka dhacday doorashadii ugu horreysay ee madaxtinimada kadib xuriiyaddii waxaana muddo hal sano oo kumeelgaar ah la doortay **Aadan Cabdulle Cismaan,**ujeeddadu waxay ahayd in uu dalka sii hogaamiyo ilaa inta dastuurka afti dadwayne looga qaadaayo.

Dastuurka waxaa afti loo qaaday 20Juun 1961, kadibna afartii luuliyo 1961, ayaa Maxkamadda sare ee dalku ku dhawaaqday in aftidii dastuurka loo qaaday ay tahay ansax.

2- 6 Luuliyo 1961' ayaa la qabtay doorashii labaad oo madaxtinimada ee dalka ka qabsoontay Xurriyaddii kadib' maadaama uu dhamaaday hal kii sanno oo KMG ahaa dastuurkiina afti dadwayne loo qaaday, doorashadaan waxaa lagu doortay mar kale madaxwayne Aadan Cabdulle Cismaan oo muddo xileedkiisu ahaa 6 sanno.
3- Doorashadii 3aad waxay dhacday 10 Juun 1967, doorashadaan waxaa madaxwayne loogu doortay Mudane C/rashiid Cali Sharmaarke si uu dalka u hogaamiyo muddo xileed 6 sanno ah sida uu jiddeynaayay dastuurkii 1960.[6]

[6] Xafiiska Guddoomiyaha Barlamaanka Federaalka Soomaaliya:Taxanaha Shuruucda iyo Nstiijooyinka doorashooyinka golayaasha sharcudejinta iyo madaxwaynayaasha ay soo yeelatay soomaaliya tan iyo 1959 ilaa 2012. 5 September 2016

Ma jiro muran ama khilaaf ka dhashay doorashooyinkaaan madaxtinimada ee aan soo tilmaannay oo la geeyay maxkamadda sare ee dalka, taa badalkeeda tartamayaashu way ku qancaayeen natiijada ka soobaxda doorashooyinkaan .[7]

B-2- Doorashooyinkii golayaasha Maamulka Dawladaha hoose

November 1963, waxaa dalka ka dhacay doorashooyinkii dawladaha hoose oo ahaa kuwii ugu horrreyay xurriyadda kadib , waxaa jiray xurriyadii ka hor doorashooyin noocaan ah oo ka dhacay Goballada koonfureed iyo kuwa waqooyi' hase ahaatee kuwaan waxay ahaayeen kuwii ugu horreyay doorasho golayaasha dawladaha hoose xurriyadda kadib.

Doorashooyinkaan waxay ka dhaceen goballadda dalka oo dhan waxaana lagu maamulaayay Sharciga doorashooyinka golayaasha dawladaha hoose ee sharci Lr 19 soona baxay 14 Agoosto 1963.

Mugdishu, waxay ka mid ahayd dawlaha hoose ee doorashooyinku ka dhaceen, doorashadii lagu doortay golaha dawladda hoose ee mugdishu iyo duqii magaalada waxaa ka dhashay muran, dhaxmaray golahii Mugdishu ee la doortay iyo wasiirkii arrimaha gudaha waxaana muran kaas go'aankii ugu dambeeyay ka gaaray Maxkamadda sare ee dalka sida ka muuqata go'aanka Maxkamadda sare ee hoos ku xusan:-

[7]Ibrahim Hashi Jama (2007) The Somaliland Constitution: Experience To date and Future Developments (A discussion paper)

Axmed Muude Xuseen iyo Golaha deegaanka Magaaladda Muqdisho

LID Wasiirka Wasaaradda Arimaha Gudaha

26 November 1963 waxaa Magaaladda Muqdisho ka dhacday doorashada Golaha deegaanka Muqdisho , Golahaas oo yeeshay fadhigiisi ugu horeeyay 2 Janaayo 1964 isla markaana **Axmed MuudeXuseen** u doortay gudoomiyaha Golaha Deegaanka ahna duqa Magaaladda Muqdisho. Isla maalintaas ayaa wasiirka arimaha Gudahu soo saaray wareegto uu ku kala diraayo golihii deegaanka isla markaana uu ku tirtiraayo doorashidii ay ku doortayn **Axmed MuudeXuseen** isaga oo cuskanaaya farqada 1aad ee qodobka 44aad ee xeerka Maamulka iyo doorashooyinka golayaasha dawladaha hoose , sidoo kale wasiirku wuxuu wareegtadiisa ku magacaabay guddi gaar ah oo maamula magaaladda muqdisho inta laga soo dooranaayo golihii dawladda hoose ee mugdishu.

Wasiirku wuxuu kala darista golaha deegaanka iyo gudoomiyihi ay doortayn ku sababeeyay in 18 Agoosto 1962 uu wasiirka Arimaha Gudahu kala diray golihii deegaanka muqdisho oo uu madaxda ka ahaa Axmed Muude Xuseen sababo la xariira xil gudasha la'aan iyo karti xumo , haddana golaha cusub ee uu gudoomiyaha ka yahay Axmed Muude Xuseen aan la hubin in ay gudan karaan waajibaadkooda shaqo' walina aysan meesha ka bixin karti xumadii horay loogu kala diray golohii uu hogaaminaayay gudoomiyaha golaha la kala diray. Axmed Muude Xuseen iyo golihii deegaanka ee lakala diray waxay dacwo idaari ah ka furtayn Maxkamadda sare ee dalka si waafaqsan farqada 4aad ee qodobka 10aad ee Xeerka nidaamka garsoorka iyo farqada 3aad xarafka B ee qodobka 5aad ee xeerka nidaamka garsoorka ee xeer No:3 soona baxay 1962.

Axmed Muude Xuseen iyo golihii Deegaanka Muqdisho waxay ku doodayn in sida uu u dabaqay wasiirka Arimha guduhu farqada 1aad ee 44aad ee Xeerka Maamulka iyo doorashooyinka golayaasha dawladaha hoose ay ahayd mid khalad ah sababtoo ah qodobkaas wuxuu jiddaynayaa in wasiirku uu kala diri karo golaha deegaanka kadib marka la xaqiijiyo in ay gudan waayeen waajibaadkooda shaqo arintaas oo ku imaan karta kaliya marka golaha la siiyo waqti ay shaqa ku ku qabtaan ama ku qaban waayaan'kadibna qiimayn lagu sameeyo natiijada qiimayntaasna go`aan lagu qaato, sidoo kale waxay ku doodeen in qodobkaas uusan awood u siinaynin Wasiirka in uu maskaxdiisa ka mala -awaalo in goluhu uusan gudan doonin waajibaadkiisa shaqo isla markaana la kala diro isla fadhigi ugu horreeyay ee uu goluhu yeesho. Garyaqaanka guud ee dowlada oo matalaayay Wasaaradda arrimaha gudaha wuxuu ku dooday in wasiirku awood u leeyahay kala dirista golaha deegaanka dowlaha hoose mana jiro sharci iyo qodob si gaar ah ugu waajibinaaya wasiirka in uu kala diristiisa ku muujiyo asbaab gaar ah.

Su'aasaha ugu muhiimsan oo ay tahay in ay Maxkamadda sare ee dalku ka jawaabto waxay ahayd in wasiirku kala diristiisa uu u isticmaalay awoodiisa si waafaqsan sharciga gaar ahaan farqada 1aad Ee qodobka 44aad ee xeerka Maamulka iyo doorashooyinka golayaasha dowlaha hoose iyo in kale.

Maxkamadda sare ee dalku markii ay dhagaysatay dhinacyada dacwadda waxay ogaatay in fasiraada iyo sida loo sababeeyay wareegtada Wasiirka wasaaradda Arrimaha gudaha aysan waafaqsanayn farqada 1aad ee qodabka 44aad ee xeerka maamulka iyo doorashooyinka golayaasha dowladaha hoose sababtoo ah qodobkaas wuxuu wasiirka awood u siinayaa in uu kala diro golaha deegaanka ee dowladaha hoose kadib marka la qiimeeyo waajib gudashadooda arrintaas oo aan dhicin sababtoo ah wasiirku wuxuu soo saaray wareegtada isla fadhigi koobaad oo ay yeeshayn iyada oo ay maxkamaddu ogaatay in qiimaynta waajib gudasha la'aantu ay imaan karto kaliya marka golaha la siiyo waqti lagu qiimeeyo sidoo kale waxay Maxkamaddu ogaatay in wasiirku kala daristiisu ku sababeeyay arirn Mala-awaal ah ee uusan ku sababeen qiimayn uu ku sameeyay waajib gudashada golaha ugu danbayntii Maxkamaddu waxay go'aamisay in wareegtada wasiirka arimaha gudahu tahay mid aan sharciga waafaqsanayn isla markaana Maxkamaddu waxay fartay in Golaha deegaanka Muqdisho gutaan shaqadooda. [8]

B-3- Golayaasha Sharcidejinta

Marxaladii dawladda rayidka doorashooyinkii golayaasha sharcidajintu waxay ahaayeen sidaan soo socota:-

1- **Golihii sharcidajintii 1aad** wuxuu ka koobnaa 123 Xildhinaan oo 90 ka mid ay ahaayeen reer koonfur halka 33da kale ay ahaayeen reer waqooyi, sida uu jiddeynaayay sharcigii midawga labada gobal (Act of Union) gaar ahaan qoddobkiisa 2aad waa in la isku daro labadii barlamaan ee kala dhisnaa labada gobal' kii koonfureed oo la doortay 8 maarso 1959, iyo kii reer waqooyi oo la doortay 17 febraayo 1960.[8]

2- **Doorashadii golaha sharcidajinta qaranka ee qabsoontay 30 maarso 1964,**

[8] Doorashada barlamaanka koonfureed waxaa lagu maamulay sharci lr 26 soona baxay 12 December 1958, halka kan reer waqooyi lagu maamulay sharci lr 9 ee 1958 iyo waxkabadalkiisa sharci lr 8 ee 1959

Doorashadaan waxaa lagu maamulay sharciga lambarkiisu yahay 4/ee 22 Janaayo 1964 ee ku saabsan doorashooyinka xubnaha golaha sharcidajinta' waxaana lagu doortay xubnaha golaha sharcidajinta qaranka.

3- Doorashadii golaha sharcidajinta ee qabsoontay 26 maarso 1969

Doorashadaan waxay qabsoontay 26 maarso 1969, waxaana lagu doortay xubnaha golayaasha sharcidajinta , waxaana lagu maamulay sharci LR 13 ee 6 juun 1968.

Saddaxdaan doorasho ayaa dhacay marxaladii dawladda rayidka , waa jireen doorashooyin ay qabsadayn barlamaannada labadii gobal ee midawday kahor xurriyidii iyo midawgii labada gobal .[9]

Waxaa Xusid mudan in labada doorasho ee dambe tan dhacday 1964 iyo tan kale ee dhacday 1969' labaduba ay hareeyeen khilaafaad iyo muranno baahsan oo ugu dambeyntii ay Maxkamaddda sare go'aan ka gaartay.

Tusaale doorashadii dhacday 1964, waxaa maxkamadda sare ee dalka gaaray cabashooyin dhawr ah, oo waxaa cabashooyin ka yimaadeen dagmooyinka kala ah:**(**Cadale, Aadan yabaal, Laascaanood, Hargeisa, Balcad, baladwayne, marka , barbara, Caluula, boosaaso, iyo kuwa kale , Maxkamadda sare ee dalku waa ay diiday cabashooyinkaas waxayna ku sababaysay in aysan lahayn saldhig sharci oo aan la waafajin dastuurka iyo sharciga doorashooyinka midna sida ay jiddeynayso farqadda 3aad ee qoddobka 10aad ee XNG 1962).

[9]Taxanaha Marjic horay loo soo sheegay.

Hase ahaatee, Maxkamaddu waxay aqbashay cabashadii ka timid dagmada marko oo ay soo gudbiyeen Xubnaha Xisbiyada (SDU iyo SNC) oo kala ahaa Xaaji Maxamed Xuseen iyo Xaaji Faarax Cali Cumar oo ay Maxkamadda sare aqbashay sida ka muuqata go'aanka Maxkamadda sare ee hoos ku xusan.

Xaaji Maxamed Xuseen iyo Xaaji Faarax Cali Cumar

Lid : Guddoomiya Guddiga doorashooyinka

1964, waxaa Soomaaliya ka dhacay doorashooyinka barlamaanka,waxaa dhacay in doorashadii ka qabsoomay dagmada Marka gaar ahaan goobta Nomberkeedu yahay 13, uu ka dhashay muran la xiriira tirada codadka laga dhiibtay goobtaas, waxaana lagu dooday in tirada codadka la dhiibtay ay tahay 695 iyo in ay tahay 395, baaris kadib waxaa caddaatay in tirada codadka la dhiibtay ay ahayd 395 kaliya, oo aysan ahayn 695, isla markaana Xisbiga SYL oo helay 62, uu ku darsaday 300 oo cod oo aan laga dhiibay goobta lambarkeedu yahay 13.

Markii ay arrintaas Caddaatay ayaa guddoomiyihii Guddiga doorashooyinka qaranku wuxuu soo saaray go,aan uu ku tirtiraayo dhammaan doorashadii ka dhacday dagmada marka , asaga oo arrintaas ku sababaynaayo khaladkii ka dhacay goobta lamberkeedu yahay 13.

Xaaji Maxamed Xuseen (SDU) iyo Xaaji Faarax Cali Cumar (SNC) oo ka mid ahaa murashixiintii dagmada marko iska sharaxay waxay Cabasho ka soo qaateen go'aankii guddoomiyaha guddiga doorashooyinka iyaga oo ku dooday in go'aanka guddoomiyaha guddiga doorashooyinku uu sharciga baal marsan yahay gaar ahaan sharciga doorashooyinka siyaasadda , sharcigaas wuxuu go'doomiyaha guddiga doorashooyinka siinayaa kaliya sixidda khaladaadka la xiriira doorashooyinka, ee awood uma laha tirtiridda natiijada doorashooyinka.[1]

Doodii dhinacyada kadib , Maxkamadda sare ee dalka waxaa u caddaday Arrimahaan:-

1- In guddoomiyaha guddiga doorashooyinku uu awood u leeyahay kaliya sixidda khaladaadka ka yimaado doorashooyinka
2- In go'aankii gudoomiyaha doorashooyinku uu ahaa mid sharciga baal marsan gaar ahaan sharciga doorashooyinka siyaasadda iyo golaha sharcidajinta.
3- Waajibka gudoomiyuhu wuxuu ahaa in uu codadka aan la dhiiban ee gaaraaya 300 ee cod oo sida khaladka ah loogu daray xisbiga SLY laga jaro laguna soo koobo 62 cod oo ay ka heleen goobta lr 13.

Intaas kadib, maxkamaada sare ee dalku waxay go'aamisay sidaan:

a- Maxkamadda sare waxay baabi'isay go'aankii guddoomiyaha guddiga doorashooyinka
b- Waxay amartay in 300 ee cod oo sida khaladka ah loogu daray codadka SYL laga jaro
c- In khaladka dhacay uu gudoomiyuhu ku sax muddo laba maalin ah gudahoos laga bilaabo maalinta la faafiyo Xukunka maxkamadda sare ee dalka.
d- Sidoo kale Maxkamaddu waxay amartay in hal kursi oo ansixiyo Xisbiga (SDU) oo uu murashx u haa Xaaji Maxamed Xuseen, kursi kalane loo ansixiyo Xisbiga (SNC) oo uu murashax u ahaa Xaaji Faarax Cali Cumar.

Gudoomiyihii guddiga doorashooyinku wuxuu fuliyay go,aankii maxkamadda sare wuxuuna ku fuliyay muddadii maxkamaddu go,aamisay.[10]

Sidaasna waxaa Doorashadii ku guulaystay labada Xisbi ee aan soo tilmaannay loogana guulaystay murashixii SLY Mudane C/laahi Insaaniya.[11]

Doorashooyinkii dalka ee dhacay Sannadadii 1963, iyo 1964, ee ku kala saabsanaa dawladaha hoose iyo kuwa barlamaanka murannadii ka dhashay waxaa gashay Maxkamadda sare ee dalka sida aan soo tilmaannay, go'aannadii ay Maxkamaddu gaartay badankood waxaa saluugay Xukuumaddii iyo Xisbigii talada haayay ee SYL.

Arrintaas waxay keentay in xilka laga qaado guddoomiyahii Maxkamadda sare ee dalka **Dr Guiseppe Papale,** oo Xilkaas haayay tan iyo markii Soomaaliya Xurriyadda qaadatay , ka horna ahaa guddoomiyihii Maxkamaddii Cadaaladda ee goballada koonfureed Marxaladdii wisaayada, Xilkii Guddoomiyaha Maxkamadda sare ee dalka waxaa loo magacaabay **Aldo Peronaci**,oo ahaa Guddoomiye ku xigeenkii Maxkamadda sare ee dalka , ku xigeenkiisana waxaa loo magacaabay Haji Noor Mohammed, oo u dhashay hindiya.[10]

Guddoomiyihii Maxkamadda sare ee dalka **Aldo Peronaci**, Waxaa loo arkaayay Shaqsi Dhexdhaxaad ah oo u dhaxeeya dawladda iyo Xisbiyada mucaaradka, laanta fulintane lama lahayn wax xiriir gaar ah.

[10] Mohamed Iise Turunji: The Untold History P 525

Qiyaastii dhamaadkii 1968, ayaa xilkii laga qaaday guddoomiyihii Maxkamadda sare ee dalka, sidoo kalane ku Xigeenkiisii Haji Noor Mohammed waxaa isna loo badalay Xafiiska Ra'iisu Wasaaraha, Waxaana loo magacaabay lataliyaha ra'iisu Wasaaraha ee dhinaca sharciga, waxaana Xilka guddoomiyaha Maxkamadda sare ee dalka loo magacaabay shaqsigii ugu horreeyay ee Soomaali ah oo magaciisa la yiraahdo C/raxmaan Sh. Cali Saciid, [11] C/raxmaan kama mid ahayn garsoorayaasha Maxkamadda sare ee dalka, ee wuxuu ahaa Guddoomiyaha Maxkamadda racfaanka ee Hergesa, ku Xigeynkiisana waxaa loo magacaabay Maxamud Sh.Axmed.

Dad badan oo ay ka midyihiin xisbiyadii Siyaasadda ayaa waxay aaminsanaayeen in sababta xilka looga qaaday gudoomiyihii Maxkamadda sare ee dalka ay ahayd cabsi Madaxda dawladdu ay ka qabto go'aannada uu ka gaari doonno murannada la xiriira doorashada la qaban doono, iyaga oo arrintaas ku sababeeyay in xilka qaadista ay ku soo beegantahay wax yar uun ka hor qabashadii doorashooyinka, hase ahaatee madaxdii dawladda Soomaaliya waxay Xilka qaadista ku micneeyeen in ujeeddadiisa ugu wayn ay tahay Soomaaliyaynta garsoorka Soomaaliya iyo in meesha laga saaro Ajaanibtii ka shaqayneysa garsoorka maadaama xuriyad qaadashadii Soomaaliya ay ka soo wareegtay muddo 8 sannadood ah, isla markaana ay lama huraan tahay in garsoorku uu la mid noqdo laamaha kale ee dawladda.[12]

---

[11] Sida ay tilmaameen dadkii yaqaannayC/raxmaan Sh. Cali Saciid waxay sheegeen in uu ahaa shaqsi siyaasadda ku milan oo wuxuu ka qayb qaatay inqilaabkii ka dhacay goballada waqooyi 9ilaa 10 December 1961' isaga oo ahaa shaqsiga kaliya ee ka mid ah bulshada rayidka ee wax ka ogaa inqilaabka.

[12]Mohamed Issa Trunji:Judicial independence under 1960 Constitution, Wednesday, April 17, 2019, https://www.hiiraan.com/op4/2019/apr/163398/judicial_independence_under_1960_constitution.aspx

Maarso 20kiidii 1969, waxaa dalka ka dhacay doorashooyinkii ugu muranka badnaa oo dawladda lagu eedeeyay in ay ku shubatay, kadibna Maxkamadda sare ee dalka ayaa waxaa soo gaaray cabashooyin kala duwan oo ka yimid dagmooyinka dalka sida:

a- Buurhakabo
b- Mugdisho
c- Badia
d- Hargesa
e- Bosaaso iyo kuwa kale

Cabashooyinkaan, Waxaa galay Markii ugu horreysay 3 garsoore oo Soomaali ah oo kala ah:-

1- C/raxmaan Sh. Cali Saciid, Guddoomiyihii Maxkamadda sare
2- Maxamuud Sh. Axmed Muuse, Guddoomiye ku xigeenkii Maxkamadda sare
3- Sh. Maxamed Sh. Cali : Xubin

Maxkamaddu marka ay dhageystay Cabashooyinkii waxay diiday Cabashooyinka dhamaantood iyada oo caddaysay in aan la aqbali Karin cabashooyinkaan sababo ay ka midyihiin kuwaan :-

a- Cabashooyinka laguma soo gudbin waqtigii sharcigu u gooyay
b- Cabashooyinka ma saxiixin wakiillada xisbiyada.[13]

[13] Fiiri Mohamed Issa Trunji:Judicial independence under 1960 Constitution, Wednesday, April 17, 2019, https://www.hiiraan.com/op4/2019/apr/163398/judicial_independence_under_1960_constitution.aspx

Go’aannada ay ka qaadatay maxkamadda sare ee dalku arrimaha doorashooyinka, waxay dhaliyeen muran badan oo la xiriira sida uu cadaalad u yahay, sharcigana u waafaqsan yahay.

Sida aan soo tilmaannay cabashooyinka Maxkamadda sare soo gaaray waxaa ka mid ahaa cabasho lid ku ahayd doorashadii ka dhacday dagmada buurhakabo oo dalabkii murashaxnimada laga diiday murashixii Xisbiga PMDA C/Qaadir Zoopo kadibna Dacwaddii uu ka furtay Maxkamadda G/balka iyadana aan la tixgelin doodiisii, kadibna’ sida uu qabay sharcigii doorashadu u u soo cabtay Maxkamadda sare ee dalka, oo iyaduna diiday cabashii Zoopo. Cabashada Xisbiga PMDA oo uu Zoopo murashax u haa waxay ahayd cabashadii ugu adkayd oo ay Maxkamaddu go,aan ka gaarto sababtoo ah Go’aanka Maxkamaddu wuxuu bulshada Soomaaliyeed dhaxdeeda ka dhaliyay falanqayn iyo hadal hayn aan caadi ahayn.

Go’aannada ka soobaxay Maxkamadda sare ee dalka waxay bulshada Soomaaliyeed dhaxdeeda iyo xisbiyada siyaasadda ka dhaxdhalisay buuq iyo jahawareer, waxaana markii ugu horreysay tan iyo markii Soomaaliya Xurriyadda qaadatay Su’aal la geliyay sida Go’aannada maxkamadda sare ay Cadaalad u yihiin, Waxaana hoos u dhacay kalsoonida shacabku ku qabeen hay’adaha garsoorka.[14]

Dhanka kale’ go’aankii Maxkamadda sare ee dalku ka gaartay doorashadii Buurhakabo iyo sida ay u maamushay awgeed ayaa guddoomiyihii Maxkamadda sare ee dalka C/raxmaan Sh. Cali Saciid Waxaa lagu naynaasay oo loo bixiyay (C/raxmaan buurhakabo).

[14] Fiiri Mohamed Issa Trunji:Judicial independence under 1960 Constitution, Wednesday, April 17, 2019, https://www.hiiraan.com/op4/2019/apr/163398/judicial_independence_under_1960_constitution.aspx

Khubaro badan waxay aaminsan yihiin in markii garsoorka laga qaaday ajaanibtii, loona dhiibay dad soomaali ah uu gacanta u galay laanta fulinta[15]

[15] Bogga 90 د/محمود على تويري:المجتمع المدني والتحول الديمقراطي في الصومال

Gunnaanad

Qormadaan waxay ku saabsan tahay kaalintii garsoorka ee doorashooyinkii ka qabsoomay dalka soomaaliya marxaladdii dawladda rayidka: 1960 ilaa 1969’ ujeedda qormadaan waa muujinta in uu muddadaas jiray garsoor madax-banaan,dhexdhaxaad ah loona simanyahay’ oo dhammaan xisbiyadii siyaasadda iyo dawladda si siman ugu garnaqaayay.

Dhanka kale qormadu waxay muujinaysaa in dalka marxalasdaas ay ka jirtay dawlad wanaagsan oo ciddii cabasho qabto lagu kala baxaayo hanaan cadaaladeed oo dadku u simanyahay.

Ugu dambayntii waxaan rajaynayaa in qormadaan ay gundhig u noqoto daraadaadka la xiriira mawduuca ay qormadu ku saabsan tahay oo aan wali wax laga qorin ogaalkayga.

Qareen: Daahir Maxamed Cali

Tixraacyo (Refrences)

1- Sharci lr 19 ee soobaxay 14/8/1963ee ku saabsan doorashooyinka golayaasha dawladaha hoose
2- Sharci lr 13 soona baxay 6 Juun 1968,ee lagu mideeyay doorashooyinka golayaasha dawladaha hoose iyo kuwa golayaasha golaha sharcidejinta qaranka
3- Jaamac Maxamed Qaalib : Taarikhda Soomalida : Xogogaalnimo u badan
4- Xeerka nidaamka garsoorka xeer lr 3 soona baxay 30kii Juun 1962
5- Xafiiska Guddoomiyaha Barlamaanka Federaalka Soomaaliya:Taxanaha Shuruucda iyo Nstiijooyinka doorashooyinka golayaasha sharcudejinta iyo madaxwaynayaasha ay soo yeelatay soomaaliya tan iyo 1959 ilaa 2012. 5 September 2016
6- Ibrahim Hashi Jama (2007) The Somaliland Constitution: Experience To date and Future Developments (A discussion paper)
7- DR.HAJI N.A NOOR Muhammad: The Development of The constitution Of Somali Republic
8- Sharci lr 26 soona baxay 12 December 1958,
9- Sharci lr 9 ee 1958 iyo waxkabadalkiisa sharci lr 8 ee 1959
10- [1]Mohamed Issa Trunji: Judicial independence under 1960 Constitution (April 17, 2019)https://www.hiiraan.com/op4/2019/apr/163398/judicial_independence_under_1960_constitution.aspx
11- Mohamed iise Turunji :Somalia The untold history 1941-1969
12- Mohamed Issa Trunji:Judicial independence under 1960 Constitution, Wednesday, April 17,

2019,https://www.hiiraan.com/op4/2019/apr/163398/judicial_independence_under_1960_constitution.aspx

13- Jaamac Maxamed qaalib: Taariikhda Soomalida oo Xog-ogaanimo u badan 2020.

14-

د/محمود على تويري:المجتمع المدني والتحول الديمقراطي في الصومال